

# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

Opened: - 10:13 AM

HANSARD No.26/1

Kal-fadhiga 26<sup>aad</sup>

Fadhigii 7<sup>aad</sup> 30/11/2014

### Warbixinta Wasaarada Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada 2015 oo Wasiirka Maaliyadu Golaha u jeediyay.

**Gudoomiye Md. C/raxman M. C/ilaah (Cirro):-** Waxaynu maanta u balan saneyna Warbixinta Wasaarada Maaliyada ee odoroska Miisaaniyad 2015ka, markaa waxaan ku soo dhoweynayaa Wasiirka Maaliyada, wasiir ku soo dhowow.

Md. C/caziis Maxamed Samaale  
Wasiirka Wasaarada Maaliyada.

*Mudane* Gudoomiye, Shir-gudoonka Sharafta leh iyo Mudanayaasha Sharafta leh ASC WR, Salaan ka dib, Waxa ii sharaf ah in Maanta oo taariikhdu tahay 30/11/2014 aan Golaha hor imaad si aan uga jeediyo khudbadii Miisaaniyada 2015 iyada oo Golaha Xukuumad u usoo gudbiyey golaha wakiilada 11/09/2014, isla markaana ay sharci tahay in Goluhu uu mudnaanta koowaad siiyo gudagalka dooda miisaaniyada isla waqtiga loo soo gudbiyaba, waxaana ay ahayd in aanu Golaha hornimaadno 13/9/2014 sida ku cad Buugaagta Miisaaniyada ee aanu idin soo gudbinay.

Sidoo kale waxa ii sharafa in Wasaarada Maaliyadu ay sanadihi ugu dambeeyay ku horkeenaytay Golaha Wakiilada miisaaniyada qaranka waqtigii loogu tala galay taas oo aan hore u dhici jirin, tusaale ahaan waxaanu miisaaniyadii 2013 Golaha usoo gudbinay 26/12/2012 taas oo golaha wakiiladuna ansixiyeen 31/12/2012, sidoo kale miisaaniyadii 2014 waxaanu golaha usoo gudbinay 29/09/2013 halka golaha wakiiladuna ansixiyeen 24/11/2013.

#### Miisaaniyada 2015 waxay ka koobantahay sidan:-

NO	Hay'adda	SLSH	Dollar
1.	Dawladda Dhexe	1,080,000,000,000	\$180,000,000
2.	Hayadaha Madaxa Banaan	176,846,392,352	\$29,474,399
3.	Dawladdaha Hoose	164,877,744,867	\$27,479,624
4.	Dakhliga Deeqaha caalamiga ah(Denmark& Britain)	85,800,000,000	\$14,300,000
	<b>Isugeyn</b>	<b>1,507,524,137,219</b>	<b>\$251,254,023</b>

**Korodhka Misaaniyadda:-** Waxa jirta in sadexdii sano ee u dambeeyay ay miisaaniyadu si xawliya kor ugu kacaysay iyadoo weliba sanad kasta uu soo baxayey dakhli dheeraad ahi kaas oo ka muuqda miisaaniyadaha aanu idin soo gudbinay ee 2014 iyo 2015, waxaana halkan hoose ku cad jaantuska muujinaya sida ay u kordhayso miisaaniyadu kaas oo korodhsimada miisaaniyada sanadka 2015 iyo sanadka 2010 uu yahay 283%, Sidoo kale waxaa misaaniyada 2015 dheertahay misaaniyadda 2014 qadar dhan 18%.

### **Kor u-kaca Miisaaniyada ee 2010 ilaa 2015.**

- ✓ Sanadka 2010 = \$47,000,000
- ✓ Sanadka 2011 = \$88,322,554
- ✓ Sanadka 2012 = \$106,561,540
- ✓ Sanadka 2013 = \$125,000,000
- ✓ Sanadka 2014 = \$152,000,000
- ✓ Sanadka 2015 = \$ 180,000,000

### **Faahfaahinta Kor u-kaca Miisaaniyadda meelaha muhiimka ah:-**

N	Magac	2010 sh sl	2015 sh sl	Farqi	%
<b>1</b>	Mushaharka Madaxwaynaha	2,600,000,000	819,800,000	-1,780,200,000	-68
<b>2</b>	Golaha Wakiilada	6,555,058,600	18,727,824,320	12,172,765,720	186
<b>3</b>	Golaha Guurtida	6,088,620,400	20,199,178,720	14,110,558,320	232
<b>4</b>	Nabadgalyada	157,113,836,969	439,663,884,011	282,550,047,042	180
<b>5</b>	Waxabarashada	14,633,732,140	72,602,190,058	57,968,457,918	396
<b>6</b>	Caafimaadka	8,783,810,960	35,700,043,934	26,916,232,974	306
<b>7</b>	Jaamacadaha	1,050,000,000	2,600,000,000	1,550,000,000	148
<b>8</b>	Mujaahidiinta Sooyaal	250,400,000	1,595,550,000	1,345,150,000	537
<b>9</b>	Mujaahidiinta Dhimirka	360,000,000	2,447,000,000	2,087,000,000	580
<b>10</b>	Xisbiyada	360,000,000	2,592,000,000	2,232,000,000	620
<b>11</b>	Wasaarada Arimaha Bulshada	651,231,992	4,103,474,978	3,452,242,986	530
<b>12</b>	Daryeelka Dugsiyada	37,240,000	2,420,000,000	2,382,760,000	6398
<b>13</b>	Agoomaha/Iskulada	260,000,000	3,470,000,000	3,210,000,000	1235
<b>14</b>	Daryeelka Ceelasha	460,000,000	1,032,000,000	572,000,000	124

**Faah Faahinta Shaqaalaha Dawladda:-** Waxa jirta in waqtigii talada xukuumadu lawareegtay ay culayska saartay sidii shaqo la;aanta loola dagaalami lahaa isla markaana loo hawl gelin lahaa dhiiga cusub ee jaamacada kasoo baxaya taas la shaqaaleeyay tiro dhan 7,585 qof kuwaas oo u badan dhalinyaradaas.waxa kale oo dhinaca shaqaalaha xooga la saaray wasaarada waxbarshada iyo wasaarada

caafimaadka kuwaas oo adeega ugu badan u gudbiya dadweynaha waana sidan tafaasiisha shaqaaluhu:-

<b>Magaca</b>	<b>Tirada Shaqaalaha 2010</b>	<b>Tirada Shaqaalaha 2015</b>	<b>Farqiga</b>
Dhamaan Shaqaalaha Dawlada	8,515	16,089	7,585
Wasaarada Waxbarashada	2579	6,378	3,799
Wasaarada Caafimaadka	1,439	2,588	1,149

#### **Wax-qabadka Dawlada ee Aug 2010-2014 waxay kala ahaayeen:-**

- Kordhinta Mushahaarooyinkii shaqaalaha iyo Ciidamada 120%
- Bixinta derejeda ciidamada
- waxa Lacag la,aan laga dhigay iskuulada hoose dhexe ee dawladda laga qaadijiray
- Iibinta idaacadii Qaranka
- Bedelka lacagtii giinbaarta ahayd ee Gobolka Togdheer iyo Sanaag.
- Samaynta E.Passport ka Somaliland
- Hirgelinta Mashaariicda Xoolaha, Beeraha iyo Kalluumaysiga.
- Iibinta Qalabka Cusbitaalka Hargeysa (Mishiinka kelyaha ,iyo keenida dhakhaatiir ajaaniba)
- Bixinta dayntii dawladii hore ka tagtay oo dhamayd 21 Milyanoo Dollar.
- Dhamaystirka Birijka Labaad ee Hargeysa
- Dhisida Wadada Dila ilaa Boorame
- Dhisida Wadada Wajaale ilaa kalabeydh
- Bilaabida wadada ceerigaabo ilaa Burco
- Dhismaha wadada Hargeysa ilaa xamaas
- Iskaashiga Dhismayaasha wadooyinka ee Dawlada iyo dadweynaha sida(wadada dawga cad,wadada cad ee salaxley,wadada oodweyne,wadada baligubadle iyo wadada allaybaday)
- Dhisida wadada Jidka Halleeya ilaa jiggigayar
- Dhisida Madaarka Hargeisa ( Egal airport)
- Dhisida Madaarka Berbera
- Dhisida Madaarka Burco
- DHismaha Wasaaradaha sida (Madaxtooyada, W.duulista Hawada,W. Xanaanada xoolaha,W. Dhalinta iyo Ciyaaraha, W. Horumarinta Reer Miyiga iyo deegaanka,W. Kaluumaysiga, W. Boosaha iyo is gadhsiinta, wasaarada Gaashaandhiga,wasaarada arrimaha Dibeda,wasaarada Arrimaha Gudaha,wasaarada cadaalada, Hanti dhawrka guud ee qarank.
- Guryaha Martida ee magaaloooyinka Burco,Baligubadle,Boorame,gebilay
- Xafiisyada Wasaarada Maaliyada sida (xafiiska Xisaabaadka Guud, waaxda kastamada,waaxda cashuuraha Beriga,4 xafiis oo cashuuraha Beriga hargeysa ah,xafiiska xisaabaadka iyo cashuuraha Gebilay,xafiiska kastamka kalabeydh,kastamka Boorama, kastamka seylac, Kastmaka

- ceelgaal,kastamka Baligubadle,kastamka Beer, xafiiska cashuuraha iyo xisaabaadka ceerigaabo iyo xafiiska cashuuraha iyo xisaabaadka Berbera).
- Dhismaha xafiisyada wasaardaha ee Gobolada sida, Xafiisyadda wasaarda qorsheynta qaranka ee Ceerigaabo, Burco, Berbera, xafiisyada Wasaarada Arrimaha Bulshada ee Gebilay iyo Baligubadle W.Maaliyadda iyo W.Caafimaadka).
  - Dhismaha Jaamacadda Badhan, Ceerigaabo, hargeysa, boorame iyo burco
  - DHismaha laybareriyyada jaamacada hargeysa, laybareeriga qaranka iyo Jaamacada Caamud.
  - Bixinta Kaalmooyinka Jaamacadaha, Iskuulada special needs ka, Cusbitaalada dhimirka,iskuulada Agoomaha IWM.
  - Jaangoynta Mushahaarooyinka Madaxweynaha,ku xigeenka iyo goleyaasha xeer dejinta.
  - Kordhinta Miisaaniyadda Hay'adaha adeega Bixiya sida: Waxbarashada, Caafimaadka iyo hay'adaha Nabadgeleyadda.
  - Qalabaynta ciidamada gaar ahaan milateriga iyo ciidanka Bada.
  - Kordhka Miisaaniyada Dawlada dhexe intii u dhaxaysay 2010 ilaa 2014 waa \$47 Million ilaa \$152 Million, iyadoo korodhku yahay 223%.
  - Kordhinta Miisaaniyadaha hayadaha Madaxa Banaan 150%.
  - Xaraynta Dakhligii khasnada Dawladda la baalmarin jiray sida: Maxjarka,Dekedda iyo Haamaha Berbera
  - Gudbinta xisaabxidhadii miisaaniyadaha 2010 ilaa 2013 oo aan iyaga hore loo gudbin jirin.
  - Hirgelinta Cashuurta Aan hore ujirin sida ku dhejinta Tigidhada oo markii ugu horaysay laga hirgeliyyay dhamaan Gobolada dalka 12 April 2012 Guddi u gaara dhaqan gelinteedana aanu u xilsaaray ilaa intay sidii loogu talay u fulayso
  - Hirgelinta cashuurta Hawlgabka Shaqaalahaa Dawladda Dhexe oo 1% ah
  - Hirgelinta Cashuurta E-passportka.
  - Korodhsimada Gunnada Agaasimayaasha guud SL SH 6000,000, iyo Agaasime waaxeed yada 1,500,000, Garsooryaasha iyo xeer ilaaliyayaasha 120%.
  - Dhimista Cashuuraadka iyo Habayntooda.

#### **Qorshaha Waxqabad ee Miisaaniyadda 2015 waxay noqnayaan sidan:-**

- Kharashka Doorashooyinka Golaha Wakiiladda ,Madaxtooyadda, iyo kharashka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha oo loogu tala galay \$ 6,000,000
- Qalabka iyo Saanadda ciidamada dalka ee kala duwan.
- Mashruuca Dib u dhiska wadooyinka
- Mashruuca Xannaanada Xoolaha
- Dhismaha Maktabada Berbera oo loogu talagalay \$ 80,000
- Dhismayaasha xafiisyadda dawladda sida:- Wasaaradda Biyaha, Hadhaaga Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta, Dhismaha xafiiska Hayada Shaqaalahaa Dawlada,

- Dayrka Hanti dhawraha guud ee Qaranka ,xafiisyadda Wasaaradda Maaliyada Boorama iyo Burco, Dhismayaasha iyo dib u dhiska maxkamadda gobolka iyo degmada Maroodijeex,Hoolka Wasaaradda Cadaaladda, dhismaha ciidanka Dab damiska, Hoolka iyo deyrka Wasaaradda Arrimaha Dibeda
- Hadhaaga Iibsiga rooga Garoonka kubada cagta Hargeysa
- Iibsiga gaadiidka iyo qalabka xafiisyadda Wasaaraddaha iyo Hay'addaha.
- Ka qayb qaadashada Dhismaha madaarka Burco.
- Kabka shidaalka wershedda laydhka Berbera.
- Iibinta Cagaf weyn "Bulldozer" oo loo iibinayo Wasaaradda Beeraha si loogu sameeyo Gabyanadda.
- Kaalmadda Dhimirka mujaahidiinta SNM.
- Kaalmooyinka Agoomaha oo loo kordhiyey 100%.
- Kaalmooyinka Asxaabta Qaranka oo loo kordhiyey 50%
- Bilawga Dhismaha jeelka Burco.
- Daryeelka iyo Dibudhisika iskuulada dalka
- Dhismaha 5 MCH oo laga dhisayo Gobolada dalka
- Dhismaha qaybta dadka caafimaadkoodu halista ku jiro ee ICU iyo qolka Gargaarka degdega ah ee cisbitaalka Hargeysa
- Iibinta Dawada Mishiinka Kelyaha sifeeya iyo qalabeynta cusbitaalka hargeysa waxaana ku baxay lacag dhan \$1,850,667 sanadihii hore ee 2012 ilaa 2015.
- Kharashka mushaharka dhakhaatiirta cusbitaalka hargeysa waxaana ku baxay lacag dhan \$2,158,500 sanadihii 2012 Ilaa 2015 soo socda.
- kharashka bannaynta agagaarka madaarka Egal international Airport
- Dhismaha guriga Martida ee Magaaladda Baligubadle.
- Dhismayaasha Wasaaradda Shaqadda iyo Arrimaha Bulshadda ee magaalooinka laascaanood iyo Boorama
- Qalabeynta xafiisyada Maxkamadaha Gobolka iyo Degmada Maroodi-jeex.

#### **Cashuuraha Hoos Loo dhigay Sanadkii 2011-2014 waxaa ka mid ah:-**

Tirsi	Nooca Cashuurta	Cashuurtii hore	Cashuurta Danbe
<b>1</b>	Cashuurta Macaashal macaashka Ganacsiga	24%	10%
<b>2</b>	Cashuurta Macaashal Macaashka shaqaalah	12%	6%
<b>3</b>	Cashuurta Macaashal macaashka kirada Guryaha	18%	10%
<b>4</b>	Cashuurta kala wareejinta Guryaha	6%	2%
<b>5</b>	Cashuurta kala wareejinta Baabuurta	6%	\$105 and \$55
<b>6</b>	Cashuurta Gadista	5%	5%
<b>7</b>	Cashuurta Diiwaangelinta shirkadaha	1%	Nil%
<b>8</b>	Cashuurta dhaxalka dadka isdhalay, isla dhashay iyo kuwa isku dhaxay	3%	1%
<b>9</b>	Cashuurta dhaxalka ilaa afar oday	5%	3%
<b>10</b>	Cashuurta dhaxalka wixii ka badan afar oday	10%	5%

**Cashuuraha la dhaafay iyo kuwa la dhimay sanadka 2014:-** Waxa cashuur dhaaf soo dejinta ah Golaha Wakiiladu usameeyeen sanadkii 2014 qodobada hoos ku qoran taas oo Wasaarada Maaliyadu soo jeedisay:-

1. Dhamaan qalabka Beeraha, Biyaha sida riigaga,wadooyinka sida cagafyada ,kalluunka sida laashashka, shabaakta, gaasta cuntada lagu karsado.
2. waxa la tirtiray cashuurtii kala wareejinta gaadiidka taas oo laga dhigay qimo go,an oo ah gaadiidka waaweyn \$105gaadiidka yaryara \$55.

**Soo jeedinta Cashuuraha la dhaafayo sanadka 2015:-** Sida uu tilmaamayo qodobka 54aad ee dastuurka Jsl takaaliifta waxa ogolaada qaadistooda ama tirtira oo awood u leh Golaha wakiilada hasse yeeshee Wasaarada Maaliyadu waxay leedahay soo jeedin keliya,mana jирто cashuur aan golaha wakiiladu ogolaan oo wasaarada maaliyadu uruurisaa sidaas anagoo ka duulayna qodobkaas dastuuriga ah waxa aanu golaha wakiilada horyeel in cashuurtta laga dhaafo qodobada hoos ku qoran, taas oo aanu ka rajeynayno in goluhu naga ogolaado isla markaana aanu u sameyn doonon xeer nidaamiye marka goluhu ansixiyo, waxaana kamida kuwa hoos ku qoran:-

- Dhamaan qalabka Beeraha iyo dawada lagu xanaaneeyo Beeraha ee Bacriminta (Fertilizer)
- Dhamaan cagafyada lagu dhiso wadooyinka nooc kasta oo ay yihiin oo laga dhaafo cashuurtta soo dejinta kastamada.
- Dhamaan Gaadiidka Ambalance yada caafimaadaka iyo dabdamisyada
- Qalabka wax lagu karsado sida Shooladaha naqaska iyo shooladaha dubaalada.
- Qalabka tamarta laga dhaliyo ee Cadceeda iyo dabaysha.

**Hirgalinta Go'aamadii Golaha Wakiiladda ee 2014:-** Waxa jirta in go'aankii Golaha wakiiladu ku ansixiyeen miisaniyadii 2014 ay soo raaciyeen go'aamo taas oo wasaarada maaliyadu fulisay dhamaan go'aanadii golaha Wakiiladu ay soo raaciyeen Miisaaniyaddii 2014 oo ah in hay'adaha ku jira Miisaaniyadda 2014 ee aan xeerkii lagu aas aasay lagu hor keenin mudadii 90 cisho ahayd aanu ka saarnay Miisaaniyadda 2015 nuqulkay ku lahaan jireen anagoo hoos geynay Miisaaniyadoo diina ku darnay Wasaaradihii Madaxweynuhu hoos geeyey kuwaas oo kala ah sidan:-

Tirsi	Hayadda	Wasaaradda la hoos geeyay
1	TV-ga Qaranka	Wasaaradda Warfaafinta
2	ICT-Commission	Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiina
3	Hayada Xidhiidhka Raashinka Qaranka	Wasaaradda Dib u dejinta
4	Gudiga Baadhista Xasuuga	Wasaaradda Cadaalada
5	Hayadda Qurba jooga	Wasaaradda Arimaha Dibada

**Hirgelinta Dib u habaynta Maamulka Maaliyadda(PFM Reform:-** Mudane Gudoomiye, Shir-gudoonka Sharafta leh iyo Mudanayaal Golaha Wakiilada JSL, waxaanu iyana jecelnahay inaanu warbixin kooban idinka siino Hirgalinta Dib u-habeynta Maamulka Wasaarada Maaliyada PFM reform oo dalkeena si weyn uga socda, waxaan jecelahay inaan ku soo dhoweeye Wasiiru-dawlahaa Wasaarada Maaliyada si arrinta PFMka Warbixin idiinka siiyo.

### **Wasiiru-dawlahaa Wasaarada Maaliyada Md. Cadaani.**

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, Gudomiye ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> Golaha Wakiilada, Gudoomiye ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> Golaha Wakiilada, Mudanayaasha Sharafta leh Golaha Wakiilada iyo Marti-sharafta Golaha joogta waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, Mudane Gudoomiye waxaa Sharaf ii ah inaan wax yar kooban idiinka waramo hirgalinta dib u-habeynta Maamulka Maaliyada ee loo yaqaan (Public Financial Management) oo in mudo ah wadanka ka socotey.

Mudane Gudoomiye, Waxanu ku guulaysanay inaanu meel marino dib u habaynta Maamulka Maaliyadda oo ka kooban 5 tiir iyo 14 qaybood . Waxa noo suurto gashay in naloo maalgeliyo tiirka labaad ee PFM strategy ga ee dakhliga(Domestic resource Mobilization) sida Kastamada, Cashuuraha Berriga iyo Waaxda Qorsheynta, taas oo ay naga caawin doonto Hay'adda DFID ee Dalka ingiriiska u qaabilsan deeq bixinta Meelaha xooga la saarayona waxa kamida:-

- Dib uhabaynta Cashuraha,Hirgelinta Cashuuraha & Dakhli ururinta.
- Tayaynta Waaxaha ay khusayso Dakhli ururintu iyo Dhisida hayad Dakhli ururineed oo madax banaan (Somaliland revenue authority).

Waxaanay ku bixisay hawshaas qandaraas qiimihiisu dhan yahay \$7.2 Million, kaas oo socon doona mudo 3 sano ah, Waxayn bilaabmaysaa bisha janaury 2015 taasina waxay keeni doontaa in Dakhligenu uu ka noqdo GDP (wax soo saarka dalka) ga qaranka ugu yaraan 25%, halka uu imika ka yahay 10%.

Mudane Gudoomiye, Waxaa halkan inaga fadhiya Co-ordinatorka wada Hawshan PFMka oo la yidhaahdo **Dr. Maxamed Samater**, waxaa kale oo la fadhiya khubaro Dawalada Ingriisku ay inoo soo dirtey oo inagala talinaya dib u-habeynta Maaliyada waxaana ka mid ah **Peter botin** iyo **Saliim Jefanvic** iyagoo mudo lix wiiga ah Hargeysa inala joogay, waxaan kale oo aan jeclahay madaama ay halkan fadhiyaan khubaradaa iyo dalalka inagu soo caawiyay hadey tahay dawlada ingriiska, Dawlada Denmark iyo hadey tahay Dawlada Holland.

Waxa kale oo jirta in EU, Baanka aduunka iyo deeq bixiyayaal kale iyana hada ay wadaan qorshihii dib u habaynta Maaliyadda ee la xidhiidhay 4 ta tiir ee kale oo kala ah Dhaqaaaha guud (Macro Economics), Hirgelinta Miisaaniyadda (Budget execution), Iibsiga (Procurement) iyo Ilaalinta hantida (oversight), taas wax lagaga qabandoono dhinacyada Qorsheynta, maamulka,Miisaaniyadda, Xisaabaadka, Hanti dhawrka, Baanka iyo dhamaan daneeyayaasha kale ee PFMka sida Gudida dhaqaalaha Golaha wakiilada iyo Gudida ilaalinta hantida ee golaha wakiilada,

waxaana hada naloo soo gudbiyey qaybtii hore oo kharashkoodu Noqondoono 4.5 million dollar.

Waxa kale oo aanu gacanta ku haynaa oo bilaabmi doona bisha January 2015 Nidaam Xisaabeed casri ah (Somaliland Financial Management Information System) oo Somaliland yeelato, noqona doona Mid Hay'adaha Dawlada oo dhami (Dawlada dhexe, Dawladaha Hoose & Hay'adaha Madaxabanaan) ay kuwada shaqayn doonaan waxa kale oo jira in sanadka 2016 uu qalabkani inoo ogolaan doono in miisaaniyada qaranku noqon doonto mid Goblaysan oo sidoo kale deegaamaysan taas oo in badan Golaha wakiiladu soo jeediyeen in qaabka miisaaniyada la deegaameeyo.

Waxaanu u gudbinay Madaxweynaha wax kabedelkii shuruucda Maaliyadda ee la xidhiidhay PFM ka taas oo loo soo gudbin doono Golaha Wakiiladda si dhakhsa ah isla markaan aanu idinka rajaynayno inaad hore u ansixisaan Markay idin soo gaadhaan madaama waxbadani ku xidhan yihiin.

**Wasiirka Maaliyada Md. Samaale:-** mar kale Gudoomiyaha, Shir-gudoonka iyo dhamaan Mudanayaasha Sharafta leh aad iyo aad baad ugu mahadsantihin sida maanta wakhtiga noo siiseen inaanu khudbad qaran idiinku soo bandhigno oo idiinka warano Guud ahaa Odoroska Miisaaniyada 2015ka oo aan ilaahey ka baryayno noo fududeeyo sidii uu ilaahey noogu fududeeyay Miisaaniyadihi ka horeeyayba.

Shir-gudoon/Mudaneyaal, arrinta Miisaaniyada iyo dakhliga dalka kordhintisu arrin sahlan maaha oo xoog baad u ogtihiiin, waxaad ogtihii iyadoo ay ka jirto Dunida dhaqaale xumo iyo dhibatooyin farabadan oo ka haysta xaga Miisaaniyadaha iyo xaga horumarka oo saameeyey dhammaan Dawladihi Horumaray ee aduunka iyo kuwa dunida saddexaad oo hoos u dhac dhaqaale iyo sicir barar balaadhan saameeyey, dalkeenuna la qabo aduunka.

Waxaa Ilaahey mahadiis ah in Miisaaniyadda Dawladda Dhexe 2015 ka ay ka badantahay miisaaniyadii hore ee 2014 iyo Miisaaniyadihi ka horeeyayba, 2014ku sidaan sheegay \$152 milyan bay tan Xukuumadu aheyd halka ay maanta 2015ka ka tahey \$280 milyan oo 18% baa korodh ku jira, tan dawladu \$251 milyan weeye oo aad uga badan weeye Miisaaniyadii 2014ka oo markii horeba culeys nagu aheyd, iyadana ilaahey baanu isku xidheyn oo aan weydiisaneynaa inuu noo fududeyo, waxaan uga mahadnaqeynaa dadweynaha reer Somaliland oo aan runtii iyaga la'aantood aaney lacagtaasi soo baxdeeyn oo ah Cashuur bixiyayaasha kala duwan, waxaana leeyahay ilaahey ha u barakeeyo xoolohooda, sadaqaduna xoolaha ma nusqaamiso ee wey barakeysaa.

Waxaan kale oo iyagana mahad saa'id ah siineynaa dhamaanba Wasaaradaha nala shaqeeya, si khaas ah anigu Wasiir ahaan waxaan Mahad dheeriya u celinayaan teamka Wasaarada Maaliyada ka shaqeeya ee suurta-galiyay soo saarista Miisaaniyada iyo dakhligaa dheeraadka ah oo aan la'aantood hawshaasi qabsoonteen laga bilaabo Wasiiru-dawlaha, DGga iyo dhamaanba Masuuliyiinta kala duwan ee Wasaarada Maaliyada ka shaqeeya.

Waxaan kaloo mahad dheeriya u celinaynaa Golaha Wakiilada Gudiyadooda kala duwan ee wada shaqeyntu naga dhaxayso gaar ahaan Gudidda Dhaqaalaha iyo Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka iyo Guud ahaanba Golaha Wakiilada JSI oo runtii sida ogтииин aniguna ogahey Golahani yahay Gole maanta iyo shaley iyo markastaba Gole adag, Gole shacbi soo doortay, Gole aan mudo ka tirsanaa oo aan qiimihiisa iyo sharaftiisa ogahey, iyadoo qimaha iyo qadanrinta aan u heyno awgeed aanu Miisaaniyadaha ku keenay Wakhtigeedii iyadoon gaadhin, waxaana idinka mahadnaqayaa sidii aad Miisaaniyadihii hore u ansixiseen, waxaana idinka fileynaa oo aan idinka codsaneynnaa in Miisaaniyadan idin hortaaley 2 bilood iyo 20 cisho aad si dhakso ah ansixisaan idinkoo ka gudanaya waajibkiina dastuuriga ah ee Golahani leeyahay.

Waxaan ku soo gabu-gabeynayaa Mahadnaqaa oo idinka iyo Warbaahintaba aan idiin hayno, waxaan Ilaahey ka baryaynaa in waxaynu dooneyno ee Wanaagsan uu inoo fududeeyo markasta, nabagdalyada dalka inoo hagaajiyo oo inoo sii adkeeyo, kheyrka iyo Wanaaga aynu wadnona inoo siyaadiyo, wixii xun ilaahey inaga xijaabo, aad iyo aad baad u mahadsantihiin Gole ahaan waa inoo iyo kulan dambe oo aad nagu weydiisaan wixii su'aalo ah, anagoo diyaar idiin ah ka jawaabistooda, WA BILAAHI TAWFIQ.

### **Xidhitaankii Fadhiga (House adjournment)**

**Gudoomiyaha Golaha Md. C/raxman (Cirro):-** Waxay mahadsanyihiin Wasiirka iyo Madaxda kale ee Wasaarada Maaliyadu, Wixii Su'aalo ah waxaynu lagu weydiin doonaa kulan, Miisaaniyadana waxaa lagu wareejiyaya Gudidda Dhaqalaaha, Fadhiga Barito waxaa Warbixin Xisaab Xidhada 2012 iyo 2013ka Goluhu ka dhageysanayaa Hanti-dhowraha Guud, Fadhigii maanuta Siaad ayaa ku xidhan yahay.

---

**Cawad Cali Maxamed**  
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**      **C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**

---